DAWLADDA DEEGAANKA SOOMAALIDA

# DHOOL GAZETA

## Somali Regional State

## የሶማሌ ክልላዊ መንግሥት

| | | |
|---|---|---|
| Qimaha<br>ያንዱ ዋጋ 16፡20<br>Unit Price | Dhool Gazeta Waxaa Soo Saara Golaha Xildhibaanada Dawladda Deegaanka Soomaalida | ✉ 392 |



| | | |
|---|---|---|
| Bayaan Tirsi 200/2013<br>Bayaanka Bayaaminta In Afka Soomaaliga Lagu Qoro Boodhadhka Iyo Ogeysiisyada ............ Bog 1 | አዋጅ ቁጥር 200/2013<br>ማስታወቂያዎችንና ቢልቦርዶች በሶማልኛ ቋንቋ ታትሞ እንዲዋጡ ለመድንገግ የወጣ አዋጅ...... ገጽ 1 | Proclamation No 200/2021<br>Proclamation to Proclaim Using of Somali Language for Advertisements and Billboards............ Page 1 |


**BAYAAN TIRSI:- 200/2013**

**BAYAANKA KU SOO BAXAY BAYAAMINTA IN AFKA SOOMAALIGA LAGU QORO BOODHADHKA IYO OGEYSIISYADA**

Maadaama oo Qodobka 6[aad] ee Dastuurka Dib loo habeeyay ee Deegaanka Soomaalidu si cad u dhigayo in Afka shaqo ee Deegaanku yahay afka soomaaliga, sidaas awgeedna ay waajibtahay in dhamaan macaamilka shaqo iyo Ogeysiisyada ay noqdaan kuwo lagu qoro Afsoomaali.

Maadaama oo ay lagama maarmaan noqotay in la xoojiyo islamarkaana kor loo qaado adeegsiga iyo Isticmaalka Afka Soomaaliga. Si loo ilaaliyo Hidaha, Milgaha iyo jiritaanka Qoomiyadeed ee Soomaalinimo.

Hadaba, Golaha Xildhibaanada Deegaanka oo ka duulaya Qodobka 49 (3) (b) ee dastuurka dib loo habeeyay ee Dawlada Deegaanka Soomaalidaa, wuxuu bayaaminaya sidan:

**አዋጅ ቁጥር 200/2013**

**በሶማሌ ክልል ውስጥ ማስታወቂያዎችንና ቢልቦርዶች በሶማልኛ ቋንቋ ታትሞ እንዲዋጡ ለመድንገግ የወጣ አዋጅ**

የክልሉ የስራ ቋንቋ ሶማልኛ መሆኑን በተሻሻለው የሶማሌ ክልል ህገ-መንግስት አንቀፅ 6 ሥር በግልፅ በማደንገጉ፡ በዚህ መሠረት ለሥራ ግንኙነቶችና ማስታወቂያዎች ህትመት በሶማልኛ ቋንቋ መጠቀም ግዴታ መሆኑን በማገንዘብ።

የሶማሌ ህዝብ እንደ ብሕርሰብ ባህሉን፣ ስነምግባርና ህልውና ለማስጠበቅ ሶማልኛ ቋንቋ አጠቃቀምን ማብልጸግና ማሳደግ አስፈላጊ ሆኖ በመገኘቱ፤

ስለዚህ የክልሉ ምክር ቤት በተሻሻለው የሶማሌ ክልል ሕገ መንግሥት አንቀጽ 49 (3) መሠረት የሚከተለው አውጇል:

**PROCLAMATION NO:- 200/2021**

**PROCLAMATION TO PROCLAIM USING OF SOMALI LANGUAGE FOR ADVERTISEMENTS AND BILLBOARDS**

WHEREAS፣ Article 6 of the Revised Constitution of the Somali Region has clearly declared that Somali Language is the official working language of the Region; and it is obligatory for that all working relations and publication and printing of advertisements be in Af-soomaali language;

WHEREAS it is found necessary to enhance and promote the use of Somali language; so to protect the culture, ethics and the ethnicity of Somali identity;

NOW THEREFORE, in accordance with article 49 (3) (b) of Revised Constitution of the Somali Regional State, the State Council hereby proclaimed as follows:

## QAYBTA KOWAAD

## GUUD AHAAN

**1. Ciwaan Gaaban**

Bayaankan waxaa loogu yeedhi karaa **"Bayaanka Ku Soo Baxay Bayaaminta In Afka Soomaaliga Lagu Qoro Boodhadhka Iyo Ogeysiisyada**, Bayaan tirsi: 200/2013

**2. Qeexid**

Hadii aan haboonaanta eraygu macno kale siinin, Bayaankan dhaxdiisa:

1. **"Dastuur"** waxaa loola jeedaa Dastuurka Dib loo habeeyay ee Deegaanka Soomaalida.
2. **"Deegaan"** waxaa loola jeedaa Deegaanka Soomaalida.
3. **"Xayaysiisyada Ganacsi"** Waxaa loola jeedaa dhamaan boodhadhka lagu qoro guud ahaan ama qayb ahaan Magaca, Calaamada, Astaanta ama arrimaha kale ee la xidhiidha Ganacsiga ee lagu dhejiyo goobaha wadooyinka.
4. **"Qof"** Waxaa loola jeedaa Qofka bani'aadamka ah iyo waxyaabaha kale ee sharcigu siiyay jiritaan sharci.
5. **"Xafis"** Waxaa loola jeedaa Xafiiska dhaqanka iyo Dalxiiska ee Dawlada Deegaanka Soomaalida.

**3 Ujeedada Bayaanka**

Ujeedada Bayaankani waa in Xayaysiisyada iyo Boodhdhka kala duwan ee lagu dhejinayo wadooyinka iyo goobaha kale ay noqdaan kuwo si cad u muujinaya astaanta Soomaalinimo iyo Dhaqanka suuban islamarkaana la hirgeliyo Qodobka 6[aad] ee dib loo habeeyay ee Dastuurka Dawlada Deegaanka Soomaalida.

**4. Xadka Dahqangalka**

Bayaankani waxa uu dhaqangal ku yahay qofkasta oo ku nool Deegaanka Soomaalida oo raba inuu daabacdo ama soo saaro Boodh ama Xayaysiis.



## ክፍል አንድ

## ጠቅላላ

**1: አጭር ርዕስ**

ይህ አዋጅ "በክልሉ ውስጥ ማስታወቂያዎችንና ቢልቦርዶች በሶማልኛ ቋንቋ ታትሞ እንዲዋጡ ለመድንገገ የወጣ አዋጅ ቁጥር 200/2013 ተብሎ ሊጠቀስ ይችላል፡፡

**2: ትርጓሜ**

የቃሉ አገባብ ሌላ ትርጉም የሚያሰጠው ካልሆነ በስተቀር በዚህ አዋጅ ውስጥ፡-

1. **"ህገ-መንግስት"** ማለት የተሻሻለው የሶማሌ ክልል ህገ-መንግስት ማለት ነው፡፡
2. **"ክልል"** ማለት የሶማሌ ክልል ማለት ነው፡፡
3. **"የንግድ ማስታወቂያዎች"** ማለት በሙሉ ወይም በከፊል ስያሜው፣ የንግድ ምልክት ወይም ሌሎች በጎዳናዎች ላይ በሚለጠፉና ከንግድ ጋር የተያያዙ ማስታወቂያዎችና ቢልቦርዶች ነው፡፡
4. **"ሰው"** ማለት የተፈጥሮ ሰው ወይም በህግ የሰውነት መብት የተሰጠው ነው፣
5. **"ቢሮ"** ማለት የሶማሌ ክልል ባህልና ቱሪዝም ቢሮ ማለት ነው፡፡

**3: ስለአዋጁ ዓላማዎች**

የአዋጁ ዓላማ በጎዳናዎችና በሌሎች ቦታዎች የሚለጠፉ ማስታወቂያዎች የሶማሌ ማንነትና መልካም ባህልን በግልፅ የሚያሳዩ መሆናቸው በማረጋገጥ የተሻሻለው የሶማሌ ክልል ህገ-መንግስት አንቀፅ 6ን ተግባራዊ ለማድረግ ነው፡፡

**4: የተፈጻሚነት ወሰን**

ይህ አዋጅ በማንኛውም በሶማሌ ክልል የሚኖርና ማስታወቂያ ለማውጣት የሚፈልግ ሰው ወይም ህጋዊ አካል ተፈጻሚ ይሆናል፡፡



## PART ONE

## GENERALITY

**1. Short Title**

This Proclamation may be cited as the **"Proclamation to proclaim Using of Somali Language for Advertisements And Billboards"** Proclamation no. 200/2021.

**2. Definition**

In this Proclamation, unless the context otherwise requires:

1. **"Constitution"** means the Revised Constitution of Somali Region.
2. **"Region"** means the Somali Regional State.
3. **"Commercial Advertisements"** means boards posted in streets containing the whole or part of the business name, trademarks or other matters related with the business.
4. **"Person"** means natural or Juridical person.
5. **"Bureau"** means the Somali Regional state Bureau of Culture and Tourism.

**3. Objective of the Proclamation**

The objectives of this proclamation shall be to ensure Billboards and advertisements posted in streets and other places clearly display core values of the Somali identity and to ensure article 6 of the Somali Regional State Revised constitution is implemented and translated into practice.

**4. Scope of Application**

This proclamation shall be applicable to any person residing in the Somali Region who wants to produce and printing of advertisement or boards.

## QAYBTA LABAAD

### 5. Afka lagu qorayo Xayaysiisyada iyo Boodhadhka

1. Qofkasta oo ku nool deegaanka oo Boodh ama Xayaysiis daabacanaya waxaa waajib ku ah inuu ku qoro Af-Soomaali
2. Iyadoo ay sideeda tahay Arrimaha lagu xeeriyay Qodob hoosaadka (1) ee Qodobkan, Qofkasta oo raba inuu Luuqad kale ku daro Boodhka ama Xayasiiska uu daabacanayo waa inuu ogolaansho ka helo Xafiiska.
3. Shirkadaha Daabacaada ka shaqeeya ee Deegaanka waxaa waajib ka saaranyahay inay saxaan islamarkaana Hubiyaan in Boodhadhka iyo Xayaysiisyada ay Daabacayaan ay waafaqsanyihiin Bayaankan.

## QAYBTA SADEXAAD

### 6. Waajibaadka Maamulka Magaalada iyo Dawlada Hoose

1. Hab waafaqsan Awaamiirta uu soo saaro Xafiisku Maamulka magaalada iyo Dawlada hoose waxaa waajib ka saaranyahay inay jidadka soo gala Magaalooyinka ku dhejiyaan Boodhadh ay ku qorantahay Magaalada magaceeda iyo soo dhaweyn.
2. Maamulada Magaalooyinka iyo Dawladaha hoose waxaa waajib ka saaranyahay inay xaqiijiyaan in dhamaan Boodhadhka iyo xayaysiisyada lagu dhejiyo goobaha kala duwan ee magaaladu ay waafaqsan yihiin Bayaankan, Xeernidaameedka iyo Awaamiirta loo soo saaro hab waafaqsan.

### 7. Arrimaha la xidhiidha Magacyada iyo Astaamaha

Si loo xoojiyo jiritaanka iyo Koboca Afka Soomaaliga, Xeernidaameedka uu soo saaro Golaha hawlfulinta ayaa lagu faahfaahin magacyada iyo Astaamaha loo isticmaali karo xayaysiiyada iyo boodhadhka ganacsi.



## ክፍል ሁለት

### 5፡ ማስታወቂያዎችንና ቢልቦርዶችን ስለማውጣት

1. በክልሉ ውስጥ ማስታወቂያዎችንና ቢልቦርዶችን ለማሳተምና መጠቀም የሚፈልግ ማንኛውም ሰው ሶማልኛ ቋንቋን የመጠቀም ግዴታ አለበት።
2. የዚህ አንቀፅ ንዑስ አንቀፅ (1) እንዳተጠበቀ ሆኖ ሌላ ቋንቋ ማካተት የሚፈልግ ማንኛውም ሰው ከቢሮው ፈቃድ መግኘት አለበት።
3. በክልሉ ውስጥ ማስታወቂያዎችንና ቢልቦርዶችን በማምረት ላይ የተሰማሩ ድርጅቶች ማስታወቂያዎች እና ቢልቦርዶችን በዚህ አዋጅ መሠረት እንዲያመረቱ የማረጋገጥ ግዴታ አለባቸው ።

## ክፍል ሦስት

### 6፡ የከተማ አስተዳደሮችና የከተማ አገልግሎቶች ግዴታዎች

1. የከተማ አስተዳደሩና የከተማ አገልግሎቶች ባወጡት ህጎች መሠረት ወደ ከተማው የሚገቡ መንገዶች የከተማዋን ስያሜ የሚያሳዩ ቢልቦርዶችን ለይ የእንኳን ደህና መጣችሁ መልእክት የመለጠፍ ግዴታ አለባቸው።
2. የከተማ አስተዳደሩና የከተማ አገልግሎቶች በከተማው የተለያዩ አካባቢዎች የተለጠፉ ሁሉም ማንኛውም ቢልቦርዶችና ማስታወቂያ ይህንን አዋጅና ለዚሁ ዓላማ የሚወጣውን ደንብ ላይ የተመሠረተ መሆኑን የማረጋገጥ ግዴታ አለባቸው።

### 7፡ ከስያሜዎችና ምልክቶች ጋር የተያያዙ ጉዳዮች

የሶማልኛ ቋንቋ ሁለንታዊ ዕድገትና ማብልጸግ ለማረጋገጥ፣ በሥራ አስፈፃሚ ምክር ቤት በሚወጣው ደንብ መሠረት ለማስታወቂያና ለቢልቦርዶች አገልግሎት የሚውሉ ስያሜዎችና ምልክቶችን በዝርዝር ያቀርባል



## PART TWO

### 5. Language aused for producing boards and advertisements

1. Any person residing in the Region and wants to print advertisements and boards is required to use Somali language for it.
2. Notwithstanding to the provisions of Sub Article (1) of this article, any person who wants to include additional languages to the boards and advertisements is required to obtain permission from the Bureau.
3. Printing Enterprises operating in the Region shall have the obligation to verify and ensure that billboards and advertisements they produce are in line with the provisions of this proclamation.

## PART THREE

### Article 6 Obligation of City Administrations and Municipalities

1. In accordance with directive issued by the City Administration and Municipalities shall have obligation to write name of the cities and welcoming messages on boards post on entrance roads leading into the city.
2. City Administrations and Municipalities shall have obligation to ensure that all boards and advertisements posted in different parts of the city are in accordance with the provisions of this proclamation, regulation and directive issued as pursuant with this proclamation.

### 7. Matters Related with Designations and Symbols

To ensure enrichment and development of the Somali language, Designations and Symbols that can be used for boards and advertisements shall determined by the regulations to be issued by the Executive Council.

8. **Cidaha aan Bayaankani Dhaqangal ku ahayn**

Bayaankani dhaqangal kuma aha Ururada Siyaasadeed, Ururada Diinta, Hay'adaha heer federaal iyo Hay'adaha Caalamiga ah ee ka hawlgala Deegaanka.

**QAYBTA AFRAAD**

**QODOBO KALA DUWAN**

9. **Ganaaxyada**

Qofkasta oo lagu helo inuu ku xadgudbay arrimaha lagu xeeriyay Bayaankan iyo Xeernidaameedka iyo Awaamiirta loo soo saari doono hab waafaqsan Bayaankan waxaa loo ganaaxi hab waafaqsan Xeerka Dambiyada.

10. **Awooda Soo saarista xeer**

1. Golaha hawlfulintu waxa uu soo saari karaa Xeernidaameedyada lagama maarmaanka u ah dhaqangelinta qodobada Bayaankan.
2. Xafiisku waxa uu soo saari karaa Awaamiir lagu dhaqangelinayo Bayaankan iyo Xeernidaameedka uu soo saaro Golaha hawlfulintu.

11. **Mudada Dhaqangalka Bayaankan**

Bayaankani waxa uu dhaqangelayaa maalinta uu ansixiyo Golaha Xildhibaanadda ee Deegaanku.

JIGJIGA, 25KA TIR / 2013

**MUSTAFE MUXUMED CUMAR**

**MADAXWEYNE KU XIGEENKA DAWLADDA DEEGAANKA SOOMAALIDA**



8. **አዋጁ ተፈጻሚ በማይሆንባቸው አካላት**

ይህ አዋጅ በፖለቲካ ድርጅቶች፣ በሃይማኖት ድርጅቶችና በክልል ውስጥ ለሚሰሩ የፌዴራል አካላትና ዓለም አቀፍ ድርጅቶች ላይ ተፈጻሚ አይሆንም።

**ክፍል አራት**

**ልዩ ልዩ ድንጋጌዎች**

9. **ስለቅጣቶች**

በዚህ አዋጅና በዚህ አዋጅ መሠረት የሚወጡ ሌሎች ደንቦችን ሲጥስ የተገኘ ማንኛውም ሰው በወንጀል ሕግ መሠረት ይቀጣል።

10. **ደንብና መመሪያ የማውጣት ሥልጣን**

1. የክልሉ ሥራ አስፈፃሚ ምክር ቤት ይህን አዋጅ ለማስፈጸም ደንብ ያወጣል።
2. ቢሮው ይህንን አዋጅ እና በዚህ አንቀጽ ንዑስ አንቀጽ ▯ መሠረት የሚወጣ ደንብ ለማስፈጸም መመሪያ ያወጣል።

11. **አዋጁ የሚጸናበት ጊዜ**

ይህ አዋጅ በክልሉ ምክር ቤት ከፀደቀበት ቀን ጀምሮ ተግባራዊ ይሆናል።

ጂጂጋ፣ ዛሬ ጥር 25 ቀን 2013.ዓ.ም

**አቶ ሙስጠፋ ሙሁመድ ኡመር**

**የሶማሌ ክልላዊ መንግሥት ም/ ፕሬዘዳንት**



8. **Exemptions**

This proclamation shall not be applicable to political organizations, religious organizations as well as federal entities and international organizations operating in the Region

**PART FOUR**

**MISCELLANEOUS PROVISIONS**

9. **Penalties**

Any person found guilty of violating the provisions of this proclamation as well as regulations and directives to be issues in accordance with this proclamation shall be punishable in accordance with the criminal code

10. **Power to Issue Regulation and Directive**

1. The Executive Council may issue regulations necessary for the implementation of this proclamation.
2. The Bureau may issue directives necessary for the implementation of this proclamation and regulations issued by the executive council.

11. **Effective date**

This Proclamation shall enter into force on the date of approval by the State Council.

**DONE AT JIGJIGA, TIR 2013**

**MUSTAFE MUHUMED OMER**

**VICE PRESIDENT OF THE SOMALI REGIONAL STATE**